

Xaashida Xaqiiqda: Hagida waaxaha safka hore

Shuruudaha u qalmida Lacagsiinta Shaqaalaha Safka hore waxaa dejiyay Sharci dejinta Minnesota waxaana lagu dejiyay sharciga Lacagsiinta Shaqaalaha Safka Hore. Sharcigu wuxuu aqoonsanayaa 15 waaxood oo safka hore ah; dukumeentigani waxa uu bixiyaa tusaalayaal ku saabsan goobaha shaqada ee waax kasta. Liisaskani maaha kuwo dhammaystiran, laakiin waxay bixinayaan fikrad guud oo ku saabsan nooca shaqo ee lagu sheegay waaxaha safka hore.

Waxaad ka eegi kartaa shuruudaha u qalmiitanka iyo hagitaan dheeraad ah [frontlinepay.mn.gov](https://www.frontlinepay.mn.gov). Haddii aadan hubin inaad u qalanto iyo in kale, waa inaad dib u eegto sharciga iyo hagida oo aad si run ah u buuxsato oo aad soo dirto arjiga inta lagu jiro 45-ka maalmood ee codsiga.

Waaxyaha safka hore

(1) Daryeelka muddada dheer iyo ku daryeelka guriga;

Tusaalooyinka loo shaqeeyayaasha qaybtan waxaa ka mid ah: guryaha dadka lagu xanaaneeyo; guryaha kooxda; xarunta xanaanada dadka jirran; daryeelka caafimaadka ee guriga; xarumaha daaweynta daroogada iyo khamrada ee la deganyahay; iyo xarumaha nololeed ee qofka la caawiyo.

(2) Daryeelka caafimaadka

Tusaalooyinka loo shaqeeyayaasha waaxdan waxaa ka mid ah: Xafiisyada dhakhtarka, xarumaha daaweynta duugduugista xubnaha jirka, dhakhaatiirta indhaha, dhakhaatiirta caafimaadka dhimirka iyo dhakhtarka ilkaha. Waxa kale oo ka mid ah: isbitaalada iyo rugaha caafimaadka; xarumaha qorsheynta qoyska; xarumaha daaweynta balwadaha; xarumaha sifeynta kelyaha; shaybaarrada caafimaadka; Xarumaha kaydinta dhiigga iyo xubnaha jirka; xarumaha qalliinka iyo xaaladaha degdega ah ee gaarkood u taagan; xarumaha sawir-qaadista ogaanshaha cudurka; iyo adeegyada ambalaaska ee hawada ama dhulka ee gaarka loo leeyahay.

(3) Gurmada xaaladaha degdega ah

Tusaalooyinka loo shaqeeyayaasha waaxdan waxaa ka mid ah: booliiska iyo waaxaha dab demiska; booliska gobolka; xafiisyada shariifka; iyo ambalaasta dadweynaha iyo adeegyada dab demiska.

(4) Caafimaadka dadweynaha, adeega bulshada iyo adeega maamulka

Tusaalooyinka loo shaqeeyayaasha qaybtan waxaa ka mid ah: hay'adaha adeega bulshada; khayraadka hawada iyo biyaha iyo barnaamijyada maaraynta qashinka adag; iyo hay'adaha dawlada.

(5) Maxkamadaha iyo asluubta

Tusaalooyinka loo shaqeeyayaasha qaybtan waxaa ka mid ah: nidaamka maxkamada gobolka; jeelasha, xabsiyada iyo xarumaha dadka lagu hayo ee dawladu maamusho; xafiisyada qareenada ee degmada; xafiisyada difaacayaasha dadweynaha; iyo xafiisyada ka sidaynta xabsiga ee shuruud leh, iyo tijaabogelinta asluubta..

(6) Daryeelka/haynta ilmaha

Tusaalooyinka loo shaqeeyayaasha qaybtan waxaa ka mid ah: adeegyada daryeelka carruurta; dugsiyada xanaanada; xarumaha xanaanada; daryeelka iskuulka kahor iyo kadib; iyo barnaamijyada Head Start.

- (7) **Iskuulada, oo ay ku jiraan iskuulada charter-ka, dugsiyada gobolka iyo tacliinta sare**
Tusaalooyinka loo shaqeeyayaasha qaybtan waxaa ka mid ah: iskuulada waxbarashada K-12; kulliyadaha, jaamacadaha iyo kulliyadaha hoose; dugsiyada xirfada; iyo iskuulada ganacsiga, farsamada iyo xirfada.
- (8) **Adeega cuntada, oo ay ku jiraan wax soo saarka, habaynta, diyaarinta, iibinta iyo keenista**
Tusaalooyinka loo shaqeeyayaasha qaybtan waxaa ka mid ah: wax soo saarka dalaga iyo xoolaha iyo habaynta; beeralayda biyaha; samaynta cuntada iyo cabitaanka; Jumladleyda; dukaamada cuntada iyo cabitaanka; makhaayadaha iyo kafateeriyada; dukaamada cuntada; adeega cuntada; adeegyada cuntada ee wareega; iyo adeegayaasha cuntada bisil.
- (9) **Tafaariiqda, oo ay ku jiraan iibinta, buuxinta dalabyada, qaybinta iyo u gaynta**
Tusaalooyinka loo shaqeeyayaasha qaybtan waxaa ka mid ah: dukaamada tafaariiqda iyo xarumaha kale ee iibinta tooska ah; wax iibinta elektarooniga ah; iibinta baabuurta iyo qaybaha/qalabka baabuurta; xarumaha shidaalka; adeegyada boostada; xarumaha boostada ee gaarka loo leeyahay, alaabo/waraaqo qaadaha iyo adeegyada gaarsiinta degdega ah; adeega gudbinta iyo fariinta ee maxalliga ah; iyo xarumaha kaydinta talaagadaysan iyo kaydinta guud.
- (10) **Shelterada iyo huteelada ku meel gaarka ah**
Tusaalooyinka loo shaqeeyayaasha qaybtan waxaa ka mid ah: hoteelada; mooteelada; goobaha sariirta iyo quraacda; Gurmada iyo adeegyada kale ee gargaarka ah; adeegyada cuntada bulshada, goobaha cuntada ama meelaha cuntada qaybiya; jikooyinka cuntada qaybiya; iyo sheltarada ku meelgaar ah.
- (11) **Adeegyada dhismaha, oo ay ku jiraan dayactirka iyo nadaafada**
Tusaalooyinka loo shaqeeyayaasha qaybtan waxaa ka mid ah: adeegyada nadaafada; adeegyada dayactirka xarumaha; iyo adeegyada amniga.
- (12) **Gaadiidka dadweynaha**
Tusaalooyinka loo shaqeeyayaasha qaybtan waxaa ka mid ah: gaadiidka rakaabka iyo dhulka, sida nidaamyada tareenada, nidaamka tareenada fudud, baska iyo hababka kale ee gaadiidka baabuurta; Boosteejada baska iyo xarumaha adeega; gaadiidka dadka waayeelka ah iyo gaadiidka baahiyaha gaarka ah; iyo gaadiidka baska iskuulka.
- (13) **Adeegyada gaadiidka ee dhulka iyo cirka**
Tusaalooyinka loo shaqeeyayaasha qaybtan waxaa ka mid ah: hawlgelinta garoonka diyaaradaha; maamulka gaadiidka hawada; jiidista baabuurta; gaadiidka xamuulka; raritaanka ama dejinta xarumaha xamuulka; iyo gaadiidka iyo bakhaarada.
- (14) **Wax soo saarka**
Tusaalooyinka loo shaqeeyayaasha qaybtan waxaa ka mid ah: xarumaha wax soo saarka oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn, hargaha, dharka, alwaaxyada/looxa, waraaqaha, batroolka, kiimikooyinka, bacaha, caagga, birta, birta la farsameeyey, alaabta kombuyuutarka iyo alaabta elektirooniga ah, qalabka caafimaadka iyo saadka. iyo alaabta guriga.
- (15) **Tababarka farsamada gacanta**
Qaybtaa=n waxaa ka mid ah adeegyada tababarka farsamada gacanta.